




Keydso rasiidhada kharashka waxbarashada ee ilmahaaga

Haddii aad u iibinayso qalabka iskuulka ee carruurtaada ku jirta kindergarten illaa fasalka 12aad, waxaad u qalmi kartaa nacfiyada canshuuraha midkood ama labadaba:

- K-12 Education Subtraction (Uga Goynta Waxbarashada K-12)
- K-12 Education Credit (Lacag ugu Celinta Waxbarashada K-12)


Kaydso rasiidhadaada, sababta oo ah nacfiyada labadooduba waxaa laga yaabaa in ay kaa caawiyaan yareynta canshuuraha lagaa rabo waxayna ku siin kartaa lacagta laguu soo celiyo oo korodha marka aad xarayso canshuur celintaada Minnesota.



Sanadkii la soo dhaafay, in ka badan 17,500 oo qoys ayaa helay Lacag ugu Celinta Waxbarashada K-12 waxaana u kaydsamay celcelis ahaan \$282. In ka badaan 138,000 qoys ayaa helay ka goynta Waxbarashada K-12 iyadoo celcelis ahaan ka goyntu ahayd \$1,285.


Kharashayada guud ee u qalma:

- Qalabka iskuulka (qalinqoriga, warqadaha, xisaabiyyaha)
- Qalabka kombiyuutarka iyo softiweerka ee waxbarashada
- U meerinta (tuutarka) manhajka K-12 oo uu bixinayo macallin u qalma
- Soo kiraysi ama soo iibsiga qalabka muusikada ee la isticmaalo xilliga iskuulka



Kharashaadka Aan u Qalmin:

- Qalabka iskuulka ee aan loo isticmaalin waxbarashada (boorsooyinka iskuulka, tiishk, habeeyaha (organizers))
- Adeega internetka iyo khidmadaha adeegsiga
- Dharka, oo ay ku jiraan lebiska iskuulka (marka laga reebo dharka jimicsiga ee loo baahanyahay)
- Qadada iskuulka
- Safarada qoyska



Miyaan u qalmaa?

- Si aad ugu qalanto u celinta ama ka goynta middood, labadaniba waa inay run noqdaan:
- Waxaad soo iibsatay adeegyo waxbarasho ama qalab si aad uga caawiso waxbarashada ilmahaaga
- Ilmahaagu wuxuu dhigtaa fasalka kindergarten ilaa fasalka 12aad ee iskuulada dadweynaha, kuwa gaarka loo leeyahay, ama iskuulka guriga

Xadka Dakhliga ee Barnaamij kasta

K-12 Education Subtraction: Ma jiraan xaddidaada dakhliga oo loogu talagalay uga goynta waxbarashada.

K-12 Education Credit: Dakhligaaga guud ee la hagaajiyay waa inuu ka hooseeyo heerarka halkan ka muuqda. Haddii aad u qalanto lacag ugu celinta, waa inaad xarayso canshuur celinta Minnesota si aad u dalbato lacag celinta.

Tirada carruurta u qalanta ee ku jirta K-12:	Dakhliga qoysku waa inuu ka yaryahay:
1 ama 2	\$76,000
3	\$79,000
3 ka badan	Dakhligaaga guud ee la hagaajiyay

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nacfiyadan iyo macluumaadka kale ee canshuurta oo muhiim ah, soo booqo www.revenue.state.mn.us oo gali **K12** sanduuqa Raadinta, ama naga soo wac 651-296-3781 ama 1-800-652-9094.